

cashuur saarid iyo miisaaniyada

Golaha Magaalada Bloomington wuxuu qaban doonaan dhageysi codka dadweynaha ah maalinta Isniinta, Disseembar 16, saacadu marka ay tahay 6:30 fiidnimo., si ay u ururiyaan talooyinka ku saabsan canshuuraha 2025 iyo miisaaniyada magaalada ee la soo jeediyay. Dhageysiga wuxuu ka dhici doona Rugta Golaha Magaalada (City Council Chambers) ee Bloomington ee Civic Plaza, 1800 West Old Shakopee Road. Si aad u hesho faahfaahin ku saabsan sida looga qaybgeli shakhsii ahaan ama telefoon ahaan, booqo boga blm.mn/cc-1216 ama wac lambarka 952-563-8790.

Sebtembar 9, 2024, Golaha Magaaladu waxay dejyeen cashuurta hordhaca ah ee 2025 oo ah \$89,739,962, taasoo ka tarjumaysa 11.50% cashuur koror tii 2024 ah. Qadarka canshuurta la soo jeediyay waa la dhimi karaa kahor inta aan la gaarin kordhinta kama dambaysta ah laakiin lama kordhin karo. Wixii macluumaad dheeraada ah oo ku saabsan miisaaniyadda magaalada iyo faahfaahinta dhacdooyinka ka Qaybgalka Miisaaniyadda Dadweynaha (Budget Public Engagement) ee la qabtay xagaagan iyo deyrtan, booqo blm.mn/budget.

BLOOMINGTON.

tomorrow. together.

Himiladeena

Hadafkeenu waa in aan abuurno bulsho waarta oo cajiib ah taas oo noqoneys meel ay dadku rabaan inay joogaan.

Miisaaniyadda la soo jeediyay ee 2025 waxay waafaqsan tahay Bloomington.

Berrito. Wadajir. hadafka iyo saddexda mudnaan ee qorshaha:



**Bulsho isku
xiran, oo
dadka soo
dhawaysa**



**Bulsho
caafimaad
qabta**




**Bulsho leh koboc
dhaqaale oo loo
siman yahay**

Maalgashiga Mudnaanteena

Dadka degan magaalada waxay caddeeyeen inta ay le'eg tahay qiimaha ay u leeyihi jardiinooyinka/xadiiqadaha Bloomington iyo badbaadada dadwaynaha iyada oo loo marayo Sahanka Qaranka ee Bulshada (National Community Survey™) iyo dhacdooyinka ka qaybgalka miisaaniyada sanadka oo dhan. Halkaan waxaa ku cad dhowr siyaabood oo aan u maalgelineyno mudnaantaas:

- Golaha Magaaladu waxa uu ansixiyay in si ku meel gaar ah u kordhiyo tirada saraakiisha Booliiska si ay wax uga qabtaan hawl gabka shaqaalaha ee la qorsheeyay. Tani waxay hoos u dhigi doontaa tirada saacadaha dhereaadka ah ee loo baahan yahay waxayna buuxin doontaa baahida shaqaale waqtii buuxa ah.
- Canshuurta 2025 ee la soo jeediyay waxaa sidoo kale ku jira maalgelin lagu dhameystirayo dhismaha cusub ee Bryant Park, jardiinadii/xadiiqadii ugu horreysay ee Bloomington oo si buuxda oo loo wada dhan yahay oo loo habeeeyay ay la socoto hoyga beerta.
- Lacagaha lagu dhamaystirayo Jardiinada/Beerta cusub ee Tretbaugh, oo noqon doonta jardiinada xirfadaha baaskiilkaa oo leh wadooyin laami ah iyo la falay oo jaay ah looguna tala galay aaladaha taayirrada barashad xirfadaha baaskiilkaa buuraha, ayaa sidoo kale lagu jira waxyaalaha la soo jeediyay ee canshuurta 2025.

Istaraatijiyyada Muddada Dheer ee Waaxda



- Horumarinta isbeddelka muddada-dheer ee uu bilaabay Golaha Magaalada (City Council) sanadkii 2022 si looga soo baxo qaabka waaxda dab-damiska ee lacag-bixinta lagu soo waco loona beddelo qaab isku-dhafan oo leh dab-demis waqtii-buuxa iyo kuwo waqtii dhiman ah si kor loogu qaado wakhiytida falcelinta dabka loona hagaajiyo badbaadista bulshada.
- Sii wadida ku daridda dab demiyeyaa dhereaadka ah sanad walba si loo gaaro yoolka waaxda isku dhafka ah (75 dab demiyayaal waqtii-buuxa ah, 65 dab demiyayaal waqtii-dhiman ah, 15 shaqaalahaa taliska iyo kormeerayaasha arimaha dabka la xiriira)
- Dib u cusbooneysinta lix saldhig dab damis si loo taageero qaabka isku dhafka ah, taas oo wax ka qabaneys baahiyaha muhiimka ah ee saldhigiyada laga soo bilaabo 1960-kii. Laba ayaa dib loo dhisay, iyada oo qorshuhu yahay in inta harsanna la dhameys tiro sanadka 2030.



Shaqaalaha magaalada ayaa martigelinaya mid ka mid ah toddobada miis ee macluumaadka miisaaniyadda 2025

El consejo municipal de la ciudad de Bloomington convocará una audiencia pública para escuchar de usted sobre la propuesta de recaudación de impuestos y el presupuesto de la ciudad para el año 2025, el día lunes, 16 de diciembre a las 6:30 p.m. Para más información en español, por favor visite la página de la red del internet blm.mn/property-tax

Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa kulan lagu dhegeysanayo dadwaynaha Isniinta, Disseembar 16 markay tahay saacada 6:30 fiidnimo si lagaaga dhegaysto adiga arrinta ku saabsan cashuur saarida iyo miisaaniyada Magaalada 2025 ee la soo jeediyay. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku qoran Af Soomaali, fadlan booqo blm.mn/property-tax

Hội Đồng Thành Phố Bloomington sẽ tổ chức một buổi điều trần công cộng vào thứ Hai, ngày 16 tháng Mười hai, lúc 6:30 giờ tối để nghe ý kiến của quý vị về đề xuất ngân sách và vấn đề đánh thuế năm 2025 của Thành Phố. Để tìm hiểu thêm bằng tiếng Việt, vui lòng truy cập trang mạng blm.mn/property-tax